

Waa wakhtigii la codsanayey iskuulka

Iswiidhan waa inay dhammaan carruurta dhigtaan iskuul laga bilaabo sannadka ay lix jir noqdaan ilaa iyo fasalka 9aad. Macluumaadkan waxaa loogu talagalay qofka u codsanaya ilmahiisa iskuul xilliga dayrta soo socda sannadka 2025.

Waa inaad codsataa iskuul haddii aad leedahay ilmo:

- da'diisu tahay lix jir oo bilaabi doonaa fasalka ay dhigtaan carruurta lix jirada ahi sannadka 2025.
- dhigta iskuul aan lahayn sannadka ku xiga.
- rabo inuu beddelo iskuulka in kasta oo iskuulku uu hadda dhigtaa leeyahay sannadka ku xiga.

Waxaad codsan kartaa laga bilaabo 15ka janaayo ilaa iyo 15ka febraayo.

Fasalka ay dhigtaan carruurta lix jirada ahi (förskoleklass)

Fasalka carruurta lix jirada ahi waa tallaabada ugu horaysay ee caalamka iskuulka iyo u diyaar garow waxbarasho dheeraad ah. Fasalka carruurta lix jirada ahi waa qasab laga bilaabo sannadka u ilmuhu buuxiyo lix sannadood.

Iskuulka leh fasalo sar-sare Skola med högre årskurs

Iskuulada qaarkood ma laha fasallo sar-sare dhammaantood. Waxa jira iskuulo waxbarashadoodu tahay ilaa fasallada 3aad iyo kuwa 6aad. Haddii ilmahaagu bilaabay fasalka 4aad ama 7aad dayrta 2025, oo uu hadda dhigto iskuul aan la hayn fasaladaas waa inaad markaa u dalbtaa iskuul isaga ama iyada.

Haddii ilmahaagu hadda dhigto mid ka mid ah iskuuladan leh fasaladan, waxaad markaa u baahan tahay inaad u codsato iskuul.

Iskuulada leh fasallada 3aad

- Kräpplaskolan
- Hörningsnässkolan
- Stenmoskolan
- Grindstuskolan
- Vårbackaskolan
- Skansbergsskolan
- Långsjöskolan

Iskuulada leh fasallada 6aad

- Solfagraskolan
- Snättringeskolan
- Visättraskolan
- Edboskolan
- Mörtviksskolan
- Sjötorpsskolan
- Tomtbergaskolan
- Kästaskolan

- Skogskällan
- Ängsnässkolan

Sidan ayaad iskuulka u codsan kartaa

Waxaad iskuulka ka raadinaysaa adeegga elektaroonigga ah ee degmada Huddinge. Waxaad ka heli kartaa bogga mittskolval.se/choice/kommun/0126

Si aad u isticmaasho adeegga elektaroonigga ah waxaad u baahan tahay aqoonsiga (BankID ama Mobile BankID) kaas oo aad ka heleyso bangigaaga. Haddii aanad fursad u helayn inaad samaysato aqoonsiga elektaroonigga ama haddii aad u baahan tahay caawimaad kale oo ku saabsan codsigaaga, waxaad la xiriiri kartaa xarunta adeegga ee degmada Huddinge, kuwaas oo ku caawin doonta adiga. Waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta adeegga telefoonka 08-535 300 00.

Dooro ugu yaraan saddex iskuul oo kala duwan

Waa inaad doorataa ugu yaraan saddex iskuul si uu codsigaagu u ansaxo. Waxaad codsan kartaa iskuulka aad la jeceshahay inuu ilmahaagu bilaabo gacanta koowaad, gacanta labaad iyo gacanta saddexaad iyo wixii la mid ah.

Soo xaqiiji codsiga

Haddii aad tihiin laba qof oo leh mas'uuliyada sharciga ee ilamaha, waa ku khasban tihiin in aad labadiinuna oggolaataan codsiga si uu u noqdo mid ansax ah. Taas waxa ka samaynaysaan isla adeegga elektaroonigga ah ee aad ka codsanaysaan iskuulka.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan iskuulada aasaasiga ah ee degmada Huddinge

Websaydka waxaa ku jira liisto ay ku qoran yihiin dhammaan iskuulada aasaasiga ah ee Huddinge: huddinge.se/grundskolor

Guji iskuulka aad xiisaynayso si aad u gasho websaydka iskuulka halkaas oo aad ka heli doonto macluumaad u gaar ah oo ku saabsan isla iskuulkaas. Waxaad sidoo kale si toos ah ula xiriiri kartaa iskuulka haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

Iskuulada degmadu leedahay ama kuwa sida gaarka ah loo leeyahay

Markaad codsanayso iskuul, waxaad kala dooran kartaa iskuulada ay degmada Huddinge leedahay, iskuulada sida gaarka ah loo leeyahay iyo iskuulada degmooyinka kale.

Doorashada dugsiga ee 2025, marka laga reebo codsiga dugsiyada degmada ee Huddinge waxaad codsan kartaa dugsiyada sida gaarka ah loo leeyahay, sida Internationella engelska skolan, Lärande Grundskola Skapa och Myrstugubergets friskola.

Haddii aad rabto inaad ka codsato iskuul si gaar ah loo leeyahay ama iskuul ku yaala degmo kale, waa inaad la xiriirtaa iskuulka aad xiisaynayso si aad u hesho warbixin ku saabsan sida loo codsado.

Haddii boos lagaa siiyo oo aad oggolaato iskuul si gaar ah loo leeyahay ama iskuul ku yaala degmo kale, waa inaad arrintan soo ogeysiisaa degmada Huddinge. Waxaa arrintaa ka samayn kartaan adeegga elektarooniga ee Iska daynaynta meelaynta iskuulka (Avstå skolplacering) taa oo aad ka heli karto service.huddinge.se.

Ogeysiin ku saabsan ku meelaynta iskuulka

Degmadu waxay soo diri doontaa jawaab ku saabsan iskuulka uu ilmahaagu boos ka helay dhammaadka bisha maarso 2025.

Waxaanu had iyo jeer isku daynaa in aanu carruurta ku meelayno mid ka mid ah iskuulada ay dadka mas'uuliyiinta ahi soo codsadeen. Si kastaba ha ahaatee, ma dammaanad qaadi karno inaad heli doonto mid ka mid ah codsiyadaada.

Haddii ilmahaagu boos ka waayo mid ka mid ah iskuulada aad codsateen, isaga ama iyadu waxay boos ka heli doonaan iskuul kale oo ku yaala degmada Huddinge. Si loo go'aamiyo iskuulka uu ilmahaagu boos ka helayo, waxaanu marka hore annagu ka ambaqaadnaa u dhawaanshaha, marka labaadna mudnaanta walaalaha.

U dhawaanshaha

Carruurta dhammaantood waxay xaq u leeyihiin iskuul u dhow guriga. Laakiin mararka qaarkood waxaa dhici karta inay dad aad u badani codsadaan iskuulka. Xaaladahaas, waxaanu isticmaalnaa habka u dhawaanshaha si aanu u xisaabino iskuulka uu ilmahaagu boos ka helayo.

U dhawaanshaha macneheedu waa haddii laba carruur ahi ay boos ka rabaan hal iskuul laakiin uu hal boos oo keliya uu ka bannaan yahay, ilmaha deggan waddada ugu dheer ee iskuulka uu doortay ugu dhow ayaa xaq u yeelanayo booskaas.

Mudnaanta walaalaha

Mudnaanta walaalaha macnaheedu waa carruurta walaalaha ku leh hal iskuul la sii karo mudnaanta iskuulkaas ay dhigtaan walaalahood. Taasi waxay khusaysaa haddii:

- ilmuhu bilaabay fasalada F-3
- walaalku uu dhigto fasalada F-3
- uu u jiro laba kiiloomitir ama ka yar iskuulkaasi.

Ka akhriso warbixin badan oo ku saabsan xulashada iyo ku meelaynta wesaydka boggayaga: huddinge.se/sokaskola/urvalsprinciper

Miyaadan ku qanacsanayn ku meelaynta iskuulka ilmahaaga?

Haddii aad rabto iskuul kale oo aan ahayn kan ilmahaaga booska laga siiyey, waxaad codsan kartaa iskuul beddelesho. U fiiro in beddeleshada la samaynayaa waxay ku xiran tahay in boos la helo iyo in aanu codsigu dammaanad qaad lahayn in ilmahaagu heli doono boos kale.

Macluumaadka ku saabsan goorta aad codsan karto beddelka iskuulka waxa laga heli karaa websaydkayaga: huddinge.se/bytaskola

Racfaan ka qaado go'aanka degmada

Haddii aad u aragto in go'aanka degmadu khalad yahay, waxaad rafcaan u qaadan kartaa maxkamadda maamulka, taas oo qiimaynaysa in aannu sharciga raacnay iyo in kale markii aannu ilmahaaga meelaynay/boos siinay. U fiirso in rafcaan qaadashadu aanay si toos ah uga dhignayn in ilmahaagu heli doono meelayn/boos cusub.

Wixii macluumaad dheeraad ah ku saabsan iyo caawinta racfaan ka qaadashada, kala xiriir xarunta adeegga ee degmada Huddinge 08-535 300 00.

Bilawga iskuulka

Xilliga dayrtu wuxuu bilaabmayaa bisha agosto 2025. Waxaad macluumaad badan oo ku saabsan bilawga iskuulka kuu soo diraya iskuulka uu ilmahaagu bilaabay.

Waxyaaabo kale oo ay wanaagsan tahay in la ogaado

Iskuulka xilliga firaaqada

Inta lagu guda jiro maalinta inta aanu ilmahaagu iskuulka dhiganayn, isaga ama iyadu waxay joogi karaan iskuulka xilliga firaaqada (ardayda da'doodu u dhaxayso 6 ilaa 10 jir) ama meelaha xilliga firaaqada ee furan (ardayda da'doodu u dhaxayso 10 ilaa 13 jir).

U fiirso degmadu waxay ka qaadaysaa kharash booska xilliga firaaqada iyada oo lagu salaynayo dakhliga qoyska soo gala. Kharash go'an ayaa laga qaadaa meelaha xilliga firaaqada ee furan. Sannadka 2024, kharashku wuxuu ahaa 505 kr bishii, iyadoon loo eegayn dakhliga qoyska.

Codsiga wakhti firaaqada waxaad samayn kartaa markaad hesho ogesiinta meelaynta iskuulka ka dib. Carruurta ka tegeysa dugsiga xannaanada ee bilaabaysa iskuulka waxay kala wareejintu dhacaysaa 1da bisha agoosto. Laga bilaabo taariikhdaas, ilmahaagu wuxuu dhigan karaa iskuulka xilliga firaaqada.

Taageero gaar ah

Iskuulada degmadu waxay siiyaan taageero gaar ah ardayda u baahan. Haddii ilmahaagu u baahan yahay taageero gaar ah, la xiriir maamulaha iskuulka ee uu isagu ama iyadu boos ka helay/heshay si aad arrintan ugala hadasho. Uma baahnid inaad ku sheegto arjiga codsiga haddii ilmahaagu u baahan yahay taageero gaar ah.

Ardayda lagu qaado gaadiidka degmada

Mararka qaarkood carruurta waxay xaq u leeyihiin in iskuulka gaadiid lagu keeno. Taas macneheedu waxa weeye in ilmaha lagu keeno ama lagaga qaado iskuulka baabuur lacag si bilaash ah. Ugu horrayn waxa qaadaya baska SL, marka labaadna baska iskuulka ama tagsiga iskuulka.

Ka akhriso warbixin badan oo ku saabsan gaadiidka iskuulka websaydkayaga: huddinge.se/skolskjuts

Barashada afka hooyo

Ardayda ku hadasha luqad kale oo aan ahayn iswiidhish waxay fursad u helayaan inay luqaddan u bartaan maaddo ahaan iskuulka. Luuqadaha afka hooyo waxaa baran karaa kara laga bilaabo carruurta lix jirada ah (förskoleklass).

Waxbarashada waxaa la dhiganayaa usbuucii halmar marka ay xiisadaha iskuulku dhammaadaan ka dib, waanay ka baxsan tahay jadwalka caadiga ah

Ka akhriso warbixin badan oo ku saabsan waxbarashada afka hooyo websaydkayaga: huddinge.se/modersmal

Macluumaad dheeraad ah iyo wixii su'aalo ah

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan codsashada iskuulka waxaad ka heleysaa bogga huddinge.se/sokaskola. Haddii aad qabto su'aalo kale ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo soo dirida codsigaaga, la xidhiidh xarunta adeegga ee degmada Huddinge.

Xarunta adeegga ee degmada Huddinge

- Lambarka telefoonka: 08-535 300 00
- E-post: servicecenter@huddinge.se
- Besöksadress: Patron Pehrs väg 6, Huddinge